

Macluumaadka bukaanka laga baaray COVID-19

Bukaanka jooga rugaha qiimeynta iyo baarista (podning)

SOMALI
Rev. 27.08.20

Waxaa mid ka mid ah rugaha baaritaanka (podning) ee Gobolka Koonfurta Danmark ama xarumaha qiimeynta, lagaaga baaray SARS-CoV-2 (coronavirus). Halkan waxaad ka akhriyi kartaa sida loo helo jawaabaha baaritaanka iyo sida loo dhaqmo.

Sida loo helo jawaabaha baaritaanka

Waa in aad ku gasho NemID-gaaga bogga sundhed.dk, halkaas oo aad ka arki karto jawaabta baaritaanka. Haddii aadan lahayn NemID, la xiriiir takhtarkaaga. Inta badan waxay jawaabta heli doonaan 24-72 saacadood gudahood ka dib markii muunadda la qaaday.

Haddii lagu baaray, sababta oo ah waxaad leedahay astaamaha COVID-19, waa in aad guriga joogta oo iska ilaalisaa la xiriirka dadka kale ilaa aad jawaab ka helayso.

Haddi Muunadu waxba laga helin (negativ)

Haddii muunadu noqoto negativ, wax coronavirus ah lama arag, markii lagu baaray. Si kastaba ha noqotee, jawaabta baaritaanka oo negativ ah gebi ahaanba meesha ka ma saarayso suurtagalnimada in aad qabto 'coronavirus', meeshana kama saarayso suurtagalnimada in lagu qaadsiiin karo waqti dambe.

Sidaas darteed, waa in aad la xiriirtaa dhakhtarkaaga / dhakhtarka heeganka, haddii ay jiraan calaamado sii xumaanaya, iyo / ama haddii aad leedahay astaamo muddo dheer so jiray.

Waa in aad sii waddo raacitaanka soo-jeedinada iyo talooyinka mas`uuliyiinta oo la xiriira ka hortagga faafista. Ka akhriiso wax dheeraad ah sst .dk/corona.

Haddi tijaabadu noqoto mid (positiv)

ah Haddii natijada baaritaanku noqodo positiv, waxaad qabtaa ama lagu qaadsiiyey coronavirus.

Si loo yareeyo halista faafinta fayraska, waa inaad raacdaa taxaddarrada soo socda iyadoo la raacayo tilmaamaha Golaha Agaasinka Caafimaadka (Sundhedsstyrelsens).

- Guriga joog oo is karantiil illaa iyo inta lagu arko inaad caabuqa ka fayoo dahay (astaamo laaan muddo ah 48 saacadood).
- Haddii tijaabada baaritaanka positiv noqoto, laakiin aadan laheyn wax astaamo ah, waa in aad is-go`doomisaa 7 maalmood laga bilaabo waqtiga baaritaanka. Haddii mudadaas aad isku aragto astaamo, waa in aad ku nagaataa is go`doominta ilaa iyo intaad ka noqoto xaalad calaamada laaan ah muddo 48 saacadood.
- Ka fogow la xiriirka dadka kale. Dad kale hakugu caawiyeen tusaale ahaan adeegashda, oo ka fogow kana dhoorso dadka guriga kula jooga.
- Fiiro gaar ah u yeelo nadaafadda gacmaha oo wanaagsan
- Fiiro gaar ah u yeelo nadiifinta mararka badan ah - gaar ahaan meelaha dusha laga taabto sida meelaha leh gacan qabasho

Macluumaadka bukaanka laga baaray COVID-19

Haddii natiijada muunada baaritaanka cadayn

Haddii natiijadu tijaabada ay noqoto mid aan cadayn iyada oo lagu saleynayo tijaabadaada (tijaab aan cadayn), waa in aad iska qaado baaritaan (podning) cusub.

Sidaas darteed, waa in aad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka ah, si aad ballan cusub u samaysato.

Waa lagula soo xiriiri doonaa haddii lagu qaadsiiyey oo aad qabto coronavirus

Mar alla markii lagaa helo 'coronavirus', waxaa muhiim ah in dhammaan dadka aad xiriir dhow la yeelatey muddadaas oo ah xilli fayraska lagaa qaadi karo, in lagu wargeliyo in aad fayraska qabto. Waxaa loo yaqaan raad raaca corona (Coronaopsporing). Oo ah "ogaanshaha goor hore ee dadka lala xiriiray" waana qaab muhiim u ah ka hortagga faafitaanka caabuqa.

Haddii tijaabadaadu ay noqoto mid wax laga helay (positiv), waxaa ku soo wacaya shaqaale ka socda maamulka raad raaca Corona oo ah waax hoos timaada Golaha Agaasinka nabadgeliyada Bukaanka (Styrelsen for Patientsikkerhed). Waxay kaa caawin doonaan in aad raad-raacdo si loo ogaado xiriiryaasha kuu dhow.

Xiriiryaasha kuu dhow, tusaale ahaan, waa dadka aad la nooshahay, kuwa xiriir toos ah (is-taabasho jireed) la yeelatay ama dadka aad la leedahay xiriir dhow "fool-ka-fool" ah oo isu jirteen 1 mitir muddo ka badan 15 daqiiqo (tusaale ahaan marka aad qofka la hadlayso).

Xiriiryaasha kuu dhow, tusaale ahaan, waa dadka aad la nooshahay, kuwa xiriir toos ah (is-taabasho jireed) la yeelatay ama dadka aad la leedahay xiriir dhow "fool-ka-fool" ah oo isu jirteen 1 mitir muddo ka badan 15 daqiiqo (tusaale ahaan marka aad qofka la hadlayso).

Ma ka Shakisan tahay waxaad sameeynaysa? Hadaba la xiriir teleefanka 32 32 05 11 ee raad raaca corona (Coronaopsporing).

Ka sii darista astaamaha

Haddii calaamadahaagu ka sii daraan, tusaale ahaan. oo leh qandho sii kordhaysa, qufac ama neefsashada oo kugu adkaata, taasi waxay noqon kartaa calaamad aad u daran oo COVID-19. Sidaas darteed, isla markiiba la xiriir dhaqtarkaaga ama dhakhtarka heeganka.

Astaamaha

Astaamaha tilmaami kara caabuqa coronavirus:

- Qandho
- Qufac
- Cune xanuun
- Madax xanuun
- Murqo xanuun
- Neefsasho gaaban/adkaata

Waxaad wax dheeraad ah ka akhriyi kartaa bogga coronasmitte.dk